Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah

# الجريدة الرسمية

# Official Bulletin

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, APRIL 2024** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

# FEBRUARY-MARCH

# 2024

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXIS / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD
SAXIIX

**SHARCI LR. 20** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**

**SHARCIGA HOWLGABKA iyo LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DOWLADDA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0490/B11/24**, ku taariikheysan **05/02/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise Sharciyeedka"Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaaaha Rayidka ee Dowladda".

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaaaha Rayidka ee Dowladda.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-33-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Iise Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

Jumhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/0490/B11/24:الرقم

Muqdisho, Febraayo 05, 2024 التاريخ

**Ku: -** Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Ujeeddo: -** Soo Gudbin Ansixinta Hindise Sharciyeedka "Howlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"

**M.ne Madaxweyne;**

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee Hindise Sharciyeedka Howlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka Howlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd 25/05/2023 wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindise-sharciyeedkan kalfadhiga 3aad kulankiisa 23aad oo qabsoomay 04/09/2023 isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka 30/01/2024.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad Hindise Sharciyeedka Howlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.**

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/0123/B-11/24

Taariikh: 28/01/2024 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Guddiga Horumarinta. Adeegga Bulshada ee Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada XFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha XFS =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo: Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF4/21/2024** kuna taariikheysan **21ka Jannaayo, 2024** uuna Goluhu ku ansixiyay **Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda:**

- Waxaa Soo xaadiray: **30 Senatar.**
- Waxaa codeeyay: **30 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **28 Senatar.**
- Waxaa diiday: **2 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 30-01-2024
TIX: 158
SAXIIX: Xus. Cabdulle
GELID

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare BJFS ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Edarbaal1@gmail.com

# ANSIXINTA SHARCIGA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 30 | 28 | 2 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 21 Jannaayo, 2024 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraahim | Taariikh: 21 Jannaayo, 2024 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi | Taariikh: 21 Jannaayo, 2024 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA "HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA"

**Muqdisho,**
**21 Jannaayo, 2024**

Tix: GAS/B-11/KF4/19/024
Kalfadhiga 4aad
Kulankiisa 7aad

Taariikh: 21 Jannaayo, 2024

# GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## MARKUU AKHRIYAY:

Sharciga **"Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare **09 Sebteembar, 2023,** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

## MARKUU ARKAY:

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.50aad** iyo **Qod.51aad (4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

## MARKUU ARKAY:

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

## MARKUU TIXGELIYAY:

Sida wanaagsan ee uu Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arrimaha Bini'aaddinnimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka ee Aqalka Sare ee BFS uga soo shaqeeyay **Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.**

## MARKUU GAROWSADAY:

In danta guud ee Dalku ku jirto meel marinta **Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **4aad**, kulankiisa **7aad**, oo ay soo xaadireen **30 Senatar** (soddon Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

### ANSIXINTA SHARCIGA

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay **Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay.

### Qod.2aad

### GUDBINTA QARAARKA GOLAHA AQALKA SARE

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/0380/B-11/23 :الرقم

Muqdisho, September 07, 2023: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada ee Golaha Shacabka
Og: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDDO: SOO GUDBIN HINDISE SHARCIYEEDKA HOWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan halkan kugu soo gudbinaynaa Hindise Sharciyeedka Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda, kadib markii xildhibaannada Golaha Shacabka Kalfadhiga 3aad Kulankiisii 23aad oo qabsoomay 04/09/23 ku ansixiyeen si waafaqsan Qodobka 69(1)(a) ee Dastuurka KMG, codayntuna waxay u dhacday sidatan:

| | |
|---|---|
| **Guntanka:** | **141** |
| **Oggol:** | **139** |
| **Diiday:** | **0** |
| **Ka aamustay:** | **2** |

Haddaba, Mudane Guddoomiye waxaan si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG halkan idinku soo gudbinaynaa Hindisahan si waajibaadkiina Dastuuriga ah ugu gudataan.

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah

**M.ne Sheikh Adan Mohamed Nur - Madoobe**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HOWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA DOWLADDA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| M.ne. Sheikh Adan Mohamed Nur – Madoobe | Tar: 04/09/2023 |

| Guddoomiye K/Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| M.ne. Abdullahi Omar Abshirow | Tar: 04/09/2023 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| M.ne. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabir) | Tar: 04/09/2023 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Hala badiyo
Aus

Tixraac:XRW/0274/05/2023

Taariikh: 11/05/2023

XRW - BIXIT
13 MAY 2023
OPM - EXIT

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda

Mudane Guddoomiye,

Innaga oo ka anbaqaadeyna Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.031.05.23 ee 11/05/2023**, kaasoo uu Goluhu ku ansixiyay **"Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda"**.

Hindisahe-sharciyeedkan oo waafaqsan Dastuurka Kumeel Gaarka ah, waxa uu soo maray dhammaan habraacyadii loo asteeyay, waxa uu fududeynayaa in ay Dowladdau ku caawiso Shaqaalaha howlgabka ah helidda caddaalad iyo baxnaano.

Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah. waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda"** maadaama Hindisahani muuhiimad gaar ah u leeyahay Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 25-5-2023
TIX: 45
SAXIIX:
GELID

Tixraac:XRW/ 146 /05/2023

Tariikh: 11/05/2023

**Ku: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada** **=Muqdisho=**
**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada** **=Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

XRW - BIXIT
13 MAY 2023
OPM - EXIT

Ujeeddo: <u>Go'aan Gole, "Ansixinta Hindise-sharciyeeeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.</u>

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,**

**Markuu Arkay:** Qodobka 80aad farqadda 1 aad (a) ee Dastuurka KMG ah.

**Markuu Arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (c) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WSHAB/XAG/036/2023** ee ku taariikheysan Abriil 30, 2023 kuna saabsan codsi soo-jeedin Wasiirka Wasaaradda Saqada iyo Arrimha Bulshada.

**Markuu Arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ay ku meel-mariyeen **"Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda"** Shirka summaddiisu tahay **SHGW.031.05.23** kuna taariikheysan **11/05/2023**, Kaasoo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyay;** Mudnaanta uu dalka iyo dadka u leeyahay Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.031.05.23** ee **11/05/2023,** kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

**Gudbin**

In si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka **"Hindise-sharciyeedka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda"** si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Guud

جمهورية الصومال الفدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب المدير العام

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of the Director-General

Ref: WC & AD /XAG/284/03/2023

Date: 27/03/2023

Mudane Garyaqaan,

**Ujeeddo: Soo-gudbin "Hindise-sharciyeedka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa Hindise-sharciyeedka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda, oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu hagayo arrimaha hawl-gabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.

Hindisahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada ka guto, si hannaanka ansixintu u dhammaystirmo.

Mahadsanidin.

Mudane. Axmed Ismaaciil Xuseen
**Agaasimaha Guud,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Xoghaya joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

HQ : Martine Hospital Road, Hamarweyne District, Mogadishu, Somalia · P.O.Box: 629
Hotline No. 865880 | 0613173317 · Dg@moj.gov.so | Info@moj.gov.so · Moj.gov.so

Dr. Cawaale
27.03.2023

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 27/03/2023

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA**

جمهـــــورية الصـــومــــال الفيـــدرالــيـــة
مكـــتب محامي العام للــدولة

**THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**
**OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL**

**SUMMAD: XGG/166/2023**

**02/05/2023**

**Ku: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada** — **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha wasiiradda** — **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** — **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda **Ref: WC&AD/XAG/284/03/2023**, ee ku taariikhaysan **27/03/2023**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo gudbin Hindise Sharciyeedka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda**, iyo **Warqadda Ref: WC&XAG/301/04/2023**, ee ku taariikhaysan **04/04/2023**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo gudbin Siyaasadda Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda**, kana Soo baxday Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, ayaa waxa uu halkaan idiinku soo gudbinayaa:

1. **Hindise-Sharciyeedka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda.**

2. **Siyaasadda Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda,** oo uu Xafiiska horay ugu soo gudbisay Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda markuu darsay, kuna sameeyay hagaajin iyo sixid kuna biiriyay farsamo aan looga maarmin sameynta Hindise-sharciyeedkan iyo Siyaasaddaba, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta-guud, uuna Xafiiska ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci.

**FG**: Halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise Sharciyeedka iyo Siyaasadda Sare ku xusan.

**Avv. Cabdullaahi Cali Hilowle (Carraale)**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so, archive@sag.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA HAWLGABKA IYO LIILTIRKASHAQAALAHA RAYIDKA DAWLADDA

2024

# CUTUBKA KOOWAAD
# QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa **"Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya".**

## Qodobka 2aad
## Qeexid

1) Sharcigan dhexdiisa marka la isticmaalo magac u yaal lab waxaa soo galaya dheddigga, markala isticmaalo eray wadar tilmaamayana waxaa soo galaya midka kale.

2) Sharcigan dhexdiisa haddii aan si kale loogu sheegin ereyada soo socda waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

   b) **Halis-odorose (Actuary):** waxaa loola jeedaa qof u xilsaaran qiimeynta qaanta hawlgabka ee taagan ama mustaqbalka, isla markaasna xubin firfircoon ka ah urur Halis-odorose oo caalami ah lana aqoonsanyahay.

   t) **Qiimeynta Halis-odorose:** waxaa loola jeedaa daraasad uu sameeyo halis-odorase si loogu go'aansado xaaladda dhaqaale iyo isku filnaan ee sanduuqa hawlgabka oo lagu saleeyo mabaad'ida Halis-odorose ee si guud la isula oggolyahay iyo qiimaha munaasabka ah ee Dhigaalka si loo xaqiijiyo in sanduuqa hawlgabku uu mustaqbalka fog u sii jiro si waafaqsan halbeegyada Caalamiga ah ee Halis-odorose.

   j) **Codsade:** waxaa loola jeedaa qof sanduuqa hawlgabka ka codsanaya daryeel hawlgab ama liiltir.

   x) **Shahaadada Qiimeynta Da'da:** waxaa loola jeedaa dukumiinti da'da qofka u caddeynaya si waafaqsan Sharcigan oo ay soo saarto hay'ad Dawladeed oo awoodda soo saarista dhalashada iyo sugnaanta leh.

   kh) **Shahaadada Qiimeynta Naafanimada:** waxaa loola jeedaa dokumiintiga naafanimada qofka u caddeynaya si waafaqsan Sharcigan oo uu soo saaro guddiga caafimaadka ee sunduuqa hawlgabka.

   d) **Mushaarka Asaasiga ama Mushaarka Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa mushaarka go'an ee laqaato xilliga lagu balamay oo laga reebo wixii gunnooyin ah.

   r) **Daryeel:** waxaa loola jeedaa Ilaalinta iyo xaqsiinta dadka hawlgabka ah si waafaqsan Sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

s) **Ilmo:** waxaa loola jeedaa ilmaha uu dhalay qofka hawlgabka ah ee da' ahaan ka yar (18) sano. Ilmaha waxaa ku jiri kara oo ay ku jiraan kuwa uurka kujira oo dhashay geerida qofka hawlgabka ah ka dib.

sh) **Guddiga Caafimaadka Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban shan qof oo Sharcigan loogu magacaabay inay sameeyaan shaahaadooyinka qiimeynta da'da iyo dadka baahiyaha gaarka qaba

dh) **Dhigaal:** waxaa loola jeedaa xaddi boqolleey ahaan loo muujiyey oo dawladdu ka reebto mushaarka ka qaybgalaha adeegga hawlgabka leh iyo sidoo kale, xaddi boqoley ahaan loo muujiyey oo dawladdu ugu darto ka qeybgale kasta, laguna shubo koontada Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka ee Bankiga Dhexe Soomaaliya.

c) **Naafanimo:** waxaa loola jeedaa xaalad xanuun ama dhaawac maskaxeed, jireed ama dareen oo qofka ka dhigeysa mid aan si joogta ah uqaban karin wax shaqo ah si waafaqsan Sharcigan.

g) **Taariikhda Gelidda Adeegga Rayidka:** waxaa loola jeedaa xilliga ka qeybgale kasta loo shaqaaleeyey adeegga hawlgabka ee Dowladda.

f) **Sanad Miisaaniyadeed:** waxaa loola jeedaa muddada (12) laba iyo tobanka bilood ee sanad walba ka bilaabanaya 1da Jannaayo kuna dhammaanaysa 31ka Diseembar.

q) **Adeeggii Danbe:** waxaa loola jeeda xilliga ka qeybgale laga shaqaaleeyey Adeegga hawlgabka ee Dawladda, laga soo billaabo 1dii Janaayo 2007 ama ka dib;

k) **Mabaad'ida Halis-odorosaha ee si guud la isula oggolaaday:** waxaa loola jeedaa tabaha iyo tirarka, hay'ad halis-odoroskasi caalami ah loo aqoonsanyahay ee lagu qiimeeyo hantida iyo qaanta nidaam hawlgab iyo waliba odoroska sii jirista nidaamka hawlgabka iyadoo laga duulayo xogta dadka, odoroska qulqulka lacageed iyo qiimeynta qaanta iyo hantida

l) **Xukuumad:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

m) **Liiltir:** waxaa loola jeedaa xaq la siiyo ka qaybgale gaaray ama aan gaarin da'da hawlgabka, kaas oo aysan u bislaan adeeg hawlgab ku filan si uu u mutaysto daryeel hawlgabnimo.

n) **Wasiir:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshadda.

w) **Gudigga Kor joogteynta:** waxaa loola jeedaa Gudigga Kor joogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

h) **Ka qeybgale:** waxaa loola jeedaa qof ka mid ah shaqaalaha rayidka Dawladda oo dhigaal looga gooyo si loogu biiriyo sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka iyo qof kasta oo kale oo sanduuqa hawlgab xaq ugu yeesha helidda daryeel hawlgab ama liiltir si waafaqsan Sharcigan

y) **Adeeg hore:** waxaa loola jeedaa adeeg hawlgab leh oo uu shaqaale hadda hawlgab ah ama hawlgabaya u soo qabtay Dawladda Soomaaliya inta ka horeysa dhaqangalka Sharcigan.

bb) **Daryeel Hawlgab:** waxaa loola jeedaa daryeel dhaqaale ama maaliyadeed oo si bille ah ay Dawladdu u siiso ka qaybgale kasta adeeggii abaalgashiga ee uu ugu soo shaqeeyey Dawladda Federaalka Soomaaliya.

tt) **Da'da Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa qofku marka uu gaaro da'da 65 sano (lixdan iyo shan sano).

jj) **Hantida Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa dhaqaalaha maaliyadeed ee laga qaado ka qeybgalayaasha Dawladda, lacag bixinta gaarka ah ee loogu talagalay qaanta adeegyadii hore, ganaaxyada dhigaal ka la daahiyo iyo wixii deeqo ah ee uu helo sanduuqa hawlgabka iyo sidoo kale, faa'iidooyinka ka yimaada maalgashiga sanduuqa hawlgabka.

xx) **Sanduuqa Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda ee lagu dhisay Sharcigan.

khkh) **Hawlgabe:** waxaa loola jeedaa qofka ka fariista ama ka hawlgaba shaqada adeegga hawlgab leh ee Dawladda.

dd) **Xafiis Hawlgab:** waxaa loola jeedaa xafiis u xilsaaran arimaha hawlgabka la xiriira.

rr) **Adeeg Hawlgab leh:** waxaa loola jeedaa muddada adeegga la siinayey Dawladda oo ka soo billaabata maalinta uu ka qaybgaluhu billaabay shaqada adeegga hawlgabka leh ee Dawladda.

ss) **Adeegga Dawladda:** waxaa loola jeedaa adeegga ama shaqada Dawladda Soomaaliya loo qabtay wixii ka horeeyey bishii Diseembar, 1990 iyo wixii ka dambeyey 1dii Jannaayo 2007.

shsh) **Shaqaale Dawladeed:** waxaa loola jeedaa qof si rasmi ah looga shaqaaleeyey hay'adaha Dawladda, lehna jago joogto ah.

dhdh) **Jago Joogta ah:** waxaa loola jeedaa jago adeeg rayid ah oo miisaaniyad loo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفدرالية

qoondeeyey, kuna jirta qaab dhismeedka hay'ad si sharci ahna loo ansixiyey.

cc) **Xisaabta keydka (Reserve Account):** waxaa loola jeedaa xisaabta banki ee uu asaasay Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, oo keydka la dhigaa loogu talagalay in laga bixiyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha mutasyta si waafaqsan Sharcigan.

gg) **Xaas:** waxaa loola jeedaa qof lab ama dhedig ah, oo si sharci ah isku qabeen ka qaybgalaha geerida ka hor.

ff) **U hare:** waxaa loola jeedaa ilmaha, xaaska iyo waalidka ka qaybgalaha ee Sharcigan ku mutaysanaya daryeelid ama xaq siin.

qq) **Daryeel U hare:** waxaa loola jeedaa daryeelka ama xaqa Sharcigan lagu bixiyo marka uu ka qaybgale dhinto ee la siiyo dhaxaltooyadiisa.

## Qodobka 3aad
## Da'da Hawlgabka

1) Da'da hawlgabka shaqaalaha rayidka ee adeegga Dawladda waa 65 (Lixdan iyo Shan) sano, lab iyo dhedig.

2) Inta laga dhisayo Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda, qofka ka qeybgalaha ah shaqaale ayuu sii ahaanayaa, lamana gelinayo hawlgab.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Sharcigan

1) Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa qof kasta oo Dawladda Federaalka Soomaliyeed looga shaqaaleysiiyey adeeg hawlgab leh, uguna jira diiwaanka rasmiga ah ee shaqaalaha rayidka Dawladda marka uu Sharcigan dhaqangal noqdo.

2) Sharcigan laguma dabaqayo shaqaalaha sida:

   b) Ciidamada qalabka sida

   t) Shaqaalaha kumeelgaarka ah iyo kuwa ku shaqeeya heshiisyo muddeysan/cayiman.

   j) Kuwa leh Xeer kale ee hawlgab.

   x) Xubnaha ku yimaada siyaasad doorasho.

3) Iyadoo la raacayo qodobada Sharcigan, muddada mutaysiga adeeggii dambe waxay ka bilaabmaysaa 1da Jannaayo 2007.

4) Qaanta adeeggii hore ee shaqaalaha u soo shaqeeyey Dawladda ka hor Jannaayo 1991kii ee hadana dib ugu soo laabtay adeegga Dawladda 1dii Jannaayo 2007dii iyo ka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

dibna, waxaa la siinayaa qaanta adeeggii hore oo ay bixinayso Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka.

5) Qiimeynta Halis hilaadinta qaanta adeeggii hore waxaa lagu darayaa qiimeynta sanduuqa hawlgabka.

## CUTUBKA LABAAD
## MUTAYSIGA, MUTAYSI LA'AANTA IYO XAALADDA KALA GUURKA EE HAWLGABKA

### Qodobka 5aad
### Mutaysiga Hawlgabka iyo Liiltirka

1) **U Hoggaansanaanta Qodobbada Sharcigan:**

b) Shaqaalaha rayidka Dawladda ee jago joogta ah oo halwgab leh ugu shaqeeya Dawladda muddo toban (10) sano iyo wax ka badan, marka uu gaaro da'da hawlgabka waxaa loo ballanqaadayaa oo la siinayaa "daryeel hawlgab" iyadoo hawlgabka uu Sharcigan ku helayo aysan ka badnaan karin 70% (boqolkiiba todobaatan) mushaarkiisa asaasiga ah xilliga shaqo ka saarista. Daryeelka hawlgabka waxaa loo xisaabin doonaa sida soo socota:

i) Abaalmarinta adeegga dambe: daryeelka hawlgabka wuxuu la mid yahay 1/800 (pension formula for monthly pension) aad ee mushaarkiisa aasaasiga ah ee bil kasta oo uu si buuxda u dhamesytiray adeegga dambe, taasoo u dhigganta hal iyo bar boqolkiiba (1.5%) mushaar sanadeedka uu helo shaqaalaha. Mushaar sanadeedka hawlgabka ee shaqsi walba waxaa lagu sameynayaa dib u qiimeyn iyadoo si celcelis ah loo kordhinayo mushaarka aasaasiga ah ee shaqaalaha laga soo billaabo sanadka uu kasbaday illaa sanadka hawlgabka ee shaqaalaha hawlgabaya.

ii) Abaalmarinta Adeeggii hore: daryeelka hawlgabka wuxuu la mid yahay 1/800 (pension formula for monthly pension) aad mushaarka aasaasiga ah ee bisha adeeggii hore ee ka horeeyey marka uu Sharcigani dhaqangalo, oo lagu dhuftay tirada bilaha adeeggii hore, oo u dhiganta 1.5% (hal iyo bar boqolkiiba) ee mushaarka la sheegay ee asaasiga ah ee sanad kasta oo adeeggii hore ah.

iii) Shaqaalaha rayidka ee laga rukhseeyo/laga saaro adeegga Dawladda wixii ka danbeeya marka uu Sharcigani dhaqangalo, hawlgabka adeeggii hore waa la cusbooneysiinayaa si loo tixgaliyo kororka celceliska mushaarka aasaasiga ah inta lagu guda jiro adeegga Dawladda oo dhan, laga billaabo sanadka la ansixiyo Sharcigan ilaa sanadka hawlgabka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

t) Shaqaalaha Dawladda ee aan mutaysan hawlgab sida ku xusan faqradda (1) xarafka (b) ee qodobkan, oo jago joogta ah ka hayey adeeg hawlgab leh ee Dawladda Federaalka Soomaaliya muddo ka yar 10 (toban) sano, waxaa u xaq u yeelanaya "Liiltir" loo xisaabinayo 1 (hal) bil mushaarka asaasiga ee mushaarkii ugu dambeeyey adeegga ee sanad kasta oo la dhameystiray adeegga.

j) Qofkii mutaystay daryeel hawlgab ee meelo badan ka imaanaya, sida kasabkiisa, iyo daryeel u hare ee xubin ka mid ah qoyskiisa; iyadoo la raacayo Sharcigan, qofka wuxuu helayaa oo kaliya hal daryeel hawlgab, isagoo xaq u leh inuu doorto meesha daryeelka ugu faa'iidada badan.

**2) Qaanta adeeggii hore iyo xaaladda kala guurka Sharcigan:**

b) Shaqaalaha rayidka ee u soo shaqeeyey Dawladda ka hor Jannaayo 1991kii ee hadana dib ugu soo laabtay adeegga Dawladda 1dii JaNnaayo 2007, iyo wixii ka dambeeyay, kaddibna gaaray da'da hawlgabka waxay mutaysanayaan oo ay xaq u yeelanayaan daryeel hawlgab oo ku salaysan adeeggii hore kaas oo lagu saleynayo sandka dhalashada sida lagu qoray shaxda lifaaqa sharcigan (Annex 1) oo tilmaameysa muddada adeeggii dambe ee uruurtay si waafaqsan qodobka 4aad, faqradihiisa (3) iyo (4) ee sharcigan.

t) Shaqaalaha rayidka ee ku soo biiray shaqada Dawladda 1dii Jannaayo 2007 iyo waxii ka dambeeyay lehna jaggo joogta ah hadana ku jira adeegga Dawladda dhammaystirayna 10 (toban) sano ama in ka badan oo adeeg hawlgab leh oo xiriir ah hadana gaaray da'da hawlgabka, waxay mutaysanayaa xaqna u yeelanayaan "daryeel hawlgab" iyadoo laga soo xisaabinayo taariikhda ay kusoo biireen adeegga Dawladda si waafaqsan Qodobka 5aad, faqradiisa (1) (b) ee Sharcigan, oo ku saleysnaanaysa wadarta uruurtay ee adeeggii dambe.

j) Shaqaalaha rayidka ee kusoo biiray shaqada Dawladda 1dii Jannaayo 2007, wixii ka dambeeyay lehna jago joogto ah hadana ku jira adeegga Dawladda balse aysan u uruurin muddo 10 (toban) sano oo adeeg hawlgab leh oo xiriir ah, marka uu gaaro da'da hawlgabka wuxuu muteysanayaa, xaqna u yeelanayaa in la siiyo "Liiltir" ah 1(hal) bil mushaarka asaasiga ee sanadka kasta ee uu dhamaystiray adeegga Dawladda ee dhammaan tirada sanadaha adeegga oo laga soo xisaabanayo taariikhda uu ku soo biiray shaqada Dawladda si waafaqsan Qodobka 5aad faqradiisa (1)(t) ee Sharcigan.

x) Shaqaalaha rayidka ee kusoo biiray shaqada Dawladda adeegga dambe laga soo bilaabo 1dii Jannaayo 2007 illaa xilliga ama taariikhda laga ansixinayo Sharcigan, waxay lahaanayaan adeegga dambe ee inta u dhaxeysa sanadaha 2007 – illaa sanadka la ansixiyo, waxaana loo tixraacayaa mushaarka aasaasiga ah ee ugu dambeeya iyo hannaanka xisaabinta hawlgabka sida lagu caddeeyey Qodobka 5aad, faqradiisa (1) (b)(i) ee Sharcigan.

## Qodobka 6aad
## Hawlgabka Naafannimo

1) **U qalmidda hawlgab:** Qofku wuxuu xaq u yeelanayaa daryeel hawlgab keliya haddii uu ku jiro adeegga hawlgabka lehlaga billaabo taariikhda uu dhaqangalo Sharcigan.

2) **Naafanimo:**

b) Qofka waxaa loo aqoonsan karaa ama loo tixgalin karaa inuu yahay naafo joogta ah ama uusanwaxba qabsan karin marka uu ka weynyahay 18 (sideed iyo toban) sano, balse uu ka yaryahay da'da hawlgabka uuna qabo naafanimo keenta inuu shaqada ka fariisto sida lagu qeexay Sharcigan

t) Guddi caafimaad oo aqoon u leh ayaa qiimeynaya codsadeyaasha hawlgabka naafanimo si ay u caddeeyaan in ay buuxiyeen shuruudaha caafimaad iyo kuwa mihnadeed ee Sharcigani uu dajiyey. Gudigga caafimaad waxa uu go'aaminayaa haddii naafanimadu ay codsadaha ka dhigayso mid aanan shaqo kasab leh qabsan karin waqtiga codsiga iyo mustaqbalkaba.

j) Codsaduhu waxaa uu arji ku dalbanayaa hawlgab naafanimo, isagoo u gudbinaya Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka muddo 90 (sagaashan) maalmood gudahood kaddib taariikhda ay naafanimadu haleeshay.

3) **Qiimeynta naafanimada**

b) Shahaadada qiimeynta naafanimada oo ay soo saaraan guddi caafimaad oo aqoon u leh, waa in ay ku caddahay:

t) Baaris caafimaad oo lagu aqoonsanayo dhibka naafanimo ee codsadaha haya iyo waqtiga naafanimadu billaabatay, baarista waa in si gaar ah loogu tilmaamo oo ay caddeysaa saameynta ay ku leedahay shaqada oo ay ku jirto in si gaar ah tilmaan looga bixiyo meelaha codsaduhu ka curyaamay ee sababta u tahay in uusan waxba qabsan karin.

j) Qiimeyn mihnadeed oo ku aadan waxqabadka nolol maalmeedka codsadaha iyo hawlaha la xiriira shaqada, taasoo ay ku jirto raadraac shaqadii u codsaduhu ka shaqeyn jiray haddiiba ay jirto.

x) Marka duruufaha naafanimo oo dhan la tixgaliyo, waa in la go'aamiyaa haddii codsadaha si uun loo shaqo gelin karo iyo haddii kale.

kh) Go'aan ka gaarsita naafanimo buuxda muddo 1 (hal) sano ka hor ama ka badan, muddadaas oo codsaduhu uusan caafimaad ahaan iyo mihnad ahaanba awoodin inuu qabto shaqo kasab leh.

d) Saadaalinta joogtonimada naafannimada.

r) Codsadaha hawlgabka naafanimada wuxuu xaq u leeyahay in uu caafimaadka iyo xeel dheerihiisa mihnadeed caddeymo uga keeno guddiga caafimaad, hase yeeshee, warbixintaas meesha kama saarayso go'aanka gudigga caafimaad oo leh awoodda xaqiijinta.

s) Dadka deggan, ku xareysan ama ay gacan siiyaan hay'adaha caawiya naafada oo ay ku jiraan kuwa dhimirka la', kuwa xanuunsan, kuwa hoyga, waxbarashada aan haysan iyo kuwa xabsiyadaku jira iyo hay'adaha kale ee miisaaniyad Dawladdu ku taageerto ma mutaysanayaan hawlgab naafanimo sida uu qabo Sharcigan.

sh) Dadka awooda inay shaqeystaan oo ay ku jiraan kuwa iskood u shaqeysta, ma mutaysanayaan hawlgab naafanimo. Qof walba oo iskiisa u shaqeysta waxay caddeyn u tahay in uusan naafo aheyn, bixinta hawlgab naafanimo waxay ku egtahay marka ugu horreysa oo uu qofka shaqo helo iskiisba ha u shaqeystee.

dh) Dadka ku qaata daryeel hawlgab si waafaqsan Sharcigan ama shuruuc kale, ma muteysanayaan hawlgab naafannimo. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay ka soo hubinayaan qorsheyaasha hawlgab ee kale in codsaduhu ka qaato dareyeel hawlgab.

4) **Baaris caafimaad si looga go'aan gaaro hawlgab naafanimo:**

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxa ay xaq u leedahay inay ka dalbato codsade kasta inuu hortago guddi caafimaad si uu u maro baaris caafimaad waqtiga iyo goobta guddigu u cayimo, sidoo kale waxaa lagu dabbaqayaa dadka hawlgabka naafanimo horay u qaadan jiray oo ay tahay in naafanimadooda dib u eegis lagu sameeyo si waafaqsan Sharcigan.

t) Codsaduhu haddii uusan marin baaris caafimaad, waxay keenaysaa in laga joojiyo inuu sii qaato hawlgabka naafanimada marka laga reebo sababo macquul ah oo Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka go'aansatay.

5) **Qaddarka iyo muddada uu soconayo hawlgabka naafanimada:**

b) Ka qeybgalaha shaqada ku naafooba wuxuu mutaysanayaa "hawlgab naafinimo" waxaa loo tixgalinayaa inuu gaaray da'da hawlgabka taas oo u dhiganta hawlgabkii uu heli lahaa haddii ka qeybgalaha uu si joogta ah uga sii shaqeyn lahaa adeeg hawlgab leh, siina qaadan lahaa heerka mushaarkiisa oo kale, uuna bilaabi lahaa helidda daryeel hawlgab marka uu gaaro da'da hawlgabka iyadoo aysana jirin wax looga dhimmayo hawlgab soo hormaray darteed.

t) Daryeelka Hawlgabka naafanimada waa mid la bixinayo inta qofka naafada ahi nool yahay, haddii ka qeybgaluhu aan u ka bogsan naafannimada.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

6) **Waajibin wargelin:**

b) Qof kasta oo soo codsaday hawlgab naafanimo, hay'adda sanduuqa hawlgabku waxay si qoraal ah ugu wargelinaysaa natiijada codsigiisa muddo 60 (Lixdan) maalmood gudahood ah, muddada waxaa la kordhin karaa 30 (Soddon) maalmood haddii Guddiga Caafimaad ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku uu u baahdo in xaqiijin caafimaad oo dheeriya la sameeyo.

t) Qofka qaata daryeelka hawlgabka naafanimada, waa inuu Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka si degdeg ah u ogeysiiyaa isbaddel kasta wixii duruufo ah oo saameyn kara muteysiga daryeelka hawlgabka naafanimada.

j) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay shaqaalaheeda rukhsad ama awoodeed u siin kartaa in ay si habeysan ama aan habeysnayn u hubiyaan una baaraan ciddii qaadata daryeel hawlgab naafanimo si ay u xaqiijiyaan xogta lagu muujiyey codsiga iyo sii jirista muteysiga daryeelka hawlgab naafanimo, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka xaq looguma lahaanayo in ay sii bixiso ogeysiis ku aaddan xilliga iyo goobta lagu sameynayo hubintaas, balse waa inay ahaataa xiliyada munaasabka ah.

x) Shaqaalaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ee u idman xaqiijinta iyo hubinta, waa inay caddeyn rukhsad awoodeed u haystaan oo ay ku hubiyaan dukumiintiga, haddii laga codsadana ay tusiyaan aqoonsigooda, mar walbana waa in ay ilaaliyaan seeraha awooddooda shaqo.

kh) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay hirgelinaysaa habraacyo si joogto ah loogula socdo dadka qaadanaya daryeelka hawlgabka naafanimada si loo xaqiijiyo sii jirista naafanimada iyo suurtagalnimada, jiritaanka shaqaaleyn ama iskiis u shaqeysta.

c) Dadka qaata daryeelka hawlgabka naafanimada, waa in ay maraan baaris caafimaad marka ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka u cayinto, ku guul dareysiga iskaashi codsi qoraal oo lala yeesho Hay'adda Sunduuqa Hawlgabka la wadaago ka qeybgalaha daryeelka hawlgabka naafanimada si loo baaro sii jiritaanka naafanimada waxay keeneysaa in la joojiyo daryeelka hawlgabka naafanimada, joojintaasi waxay soconaysaa inta hubinta laga dhameystirayo, si kastaba ha ahaatee, haddii hawlgabaha naafada ahi ku sugnaado xaaladdii muteysiga daryeelka hawlgabka naafanimo, waxaa la siinayaa wixii daryeel hawlgab naafanimo ee ka baaqday muddada baarista socotay.

## Qodobka 7aad
## Hawlgabka xilliga caadiga ah iyo midka soo hormaray

1) **Shaqo ka fariisashada xilliga hawlgabka:** Shaqo ka fariisashada xliliga da'da hawlgabka waa mid waajib ah, iyadoo shaqaalaha rayidka loo oggolaan karo inay ka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

fariistaan shaqada Dawladda ka hor inta aysan gaarin da'da hawlgabka ee lagu xusay Sharcigan ayna heli karaan daryeel hawlgab oo la soo hormariyey si waafaqsan Sharcigan.

2) **Hawlgab soo hormaray:**

   b) Haddii ka qeyb-galaha uu ka fariisto shaqada isaga oo aanan gaarin da'da hawlgabka, qaddarka daryeelka hawlgabka uu helayo waxaa laga dhimayaa 0.5% (boqolkiiba hal barkiis) bil kasta oo ka horeysa da'da hawlgabka, qiimaha isku dheelitirka waxaa dib u eegaya oo sameynaya Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, marka ay lama huraan noqoto iyadoo lagu saleynayo qiimeynta halis-odorase.

   t) Da'da hawlgabka soo hormaray waa inta u dhaxeysa 60 illaa 64 (lixdan ilaa lixdan iyo afar).

3) **Isirrada ama arrimaha qiimeynta halis-odorase hawlgabka soo hormaray:**

   b) Markasta oo qiimeyn halis-odorase la sameeyo, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa inay xaqiijisaa in halis-odorasuhu dib u qiimeyaa isirrada ama arrimaha dhimmi kara "daryeelka hawlgabka" oo haddii ay laga maarmaan noqoto ka talabixin kara in isbaddallo la sameeyo si loo dhawro halis-odorase u dhiganta daryeelka hawlgabka la soo hormariyey iyadoo loo xisaabinayo si waafaqsan Sharcigan.

   t) Haddii halis-odorasuhu ka talabixiyo in isbadello lagu sameeyo isirrada ama arrimaha wax ka dhimmi kara si loo dhawro halis-odorase u dhiganta daryeelka, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaa waajib ku ah inay ku wargaliso Wasiirka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah, oo ka billaabanaysa marka lasoo saaro qiimeynta halis-odorase, Wasiirka waxaa waajib ku ah inuu ku wargeliyo Baarlamaanka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa marka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ay ogeysiiso Wasiirka talooyinka halis-odorasaha, si la isugu dheeli tiro isirrada ama arrimaha dhimmaya daryeelka Hawlgabka si loo dhawro halis-odorase u dhiganta.

## Qodobka 8aad
## Daryeel U hare

1) **U harahayaasha muteystay:** U hareyaasha muteystay daryeel waa:

   b) Lamaane: inta ay ka guursato ama uu ka guursado.

   t) Caruurta: wiil inta uu ka gaarayo da'da 18 (sideed iyo toban) sano, gabar inta ay ka guursaneyso haddii uu ilmaha naafo yahay waa u soconayaa daryeelka.

   j) Waalid: hooyo iyo aabbe haddii ay yihiin ku tiirsanayaal.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) **Xaq u yeelashada daryeel u hare:**

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaay daryeel u hare siinaysaa u hareyaasha muteystay oo ay ka tageen hawlgabayaasha iyo ka qeybgalayaasha geeriyooday, kuwaas oo ahaa shaqaale rayid oo u diiwaangashan Dawladda xilliga ama taariikhda la ansixiyo Sharcigan.

j) U hareyaasha mutaystay ee hawlgabe/abaaldhurte geeriyooday waxaa ay mutaysanayaan helidda daryeel u hare oo u dhigma dhammaan ama qeyb daryeelka hawlgabkii uu qaadan jiray hawlgabuhu inta aanu geeriyoon, haddii daryeelka hawlgabka la kordhiyo sicir barar dartiis si waafaqsan Sharcigan, daryeelka u harayaasha sidoo kale waxaa lagu darayaa xadigga korarka hawlgabka.

x) U hareyaasha mutaystay ee ka qeybgale geeriyooday kaas oo da'diisa la egtahay ama ka weyntahay da'da hawlgabka xilliga dhimashada welina ku jiray adeeg hawlgab leh xilliga dhimashada, waxay mutaysanayaan "daryeel u hare" oo u dhigma daryeelka hawlgabka uu qaadan lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddiiba u qaadan lahaa daryeel hawlgab taariikhda dhimashada.

kh) Haddii ay geeri ku timaado ka qeybgale sabab la xiriirta dhaawac ama jirro ay shaqadu keentay isagoo ka yar da'da hawlgabka kuna jiray adeeg hawlgab leh xilliga geerida, u hareyaasha waxay mutaysanayaan daryeel u hare oo la eg intii uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday, haddiiba uu shaqo hawlgab leh ku sii jiri lahaa inta uu da'da hawlgabka ka gaarayo, uuna isla mushaarkiisa qaadan lahaa kuna billaabi lahaa hawlgabkiisa xilliga hawlgabka.

d) Haddii geerida ka qeybgale ku timid sababo dabiici ah oo aanan la xiriirin shaqo gudasho, u hareyaasha ka qeybgalaha geeriyooday oo maalinta uu geeriyooday da'diisu ka yareyd da'da hawlgabka isla markaasna ku jiray adeeg hawlgab leh, waxa ay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku saleysan xaddigga hawlgab ee uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddii qofkaas uu adeegga joojin lahaa isagoo isla mushaarkii uu qaadanayey uuna billaabi lahaa qaadashada hawlgabka maalinta uu geeriyooday

r) U hareyaasha mutaystay ee shaqaale hore ee Dawladeed oo aan ku jirin adeeg hawlgab leh oo maalinka uu geeriyooday xaq u lahaa hawlgab la dib dhigay, waxay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku salaysan xaddigga hawlgab ee uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddii qofkaas uu qaadashada hawlgabka ku bilaabi lahaa da'da hawlgabka.

s) Daryeel u hare waxaa la siinayaa oo kaliya kuwa ku mutaystay sida Sharcigani qeexay, ka qeybgalaha aan ka tegin u hare mutaystay, qof kale uma dardaarmi karo inuu qaato daryeel u hare.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

sh) Wadarta daryeelka la siinayo u harayaasha ka qeybgalaha geeriyooday marna kama badnaan karto boqolkiiba 70% (boqolkiiba toddobaatan) oo uu hawlgabuhu qaadan jiray ka hor inta aanu geeriyoon, ama hawlgabka uu shaqaale hawlgabe ahi uu mutaysan lahaa sida uu qabo Sharcigan.

**3) Daryeel hawlgab ee qoysas ay ka maqan yihiin dad lagu tirinayo in ay dhinteen:**

b) Marka ka qeybgale ama hawlgabe maqan laga waayo wax xog ah muddo 3 (saddex) sano ah, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxaa ay u qaadanaysaa in ka qeybgalahaasi geeriyooday, waxayna Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka siinaysaa daryeelka hawlgab u hareyaasha mutaystay si waafaqsan Sharcigan.

j) Bixinta daryeelka u hare waxay billaabaneysaa bisha ku xigta bisha la waayey ka qeybgalaha maqan, ilaa dib looga helayo ka qeybgalihii maqnaa.

x) Haddii la xaqiijiyo in ka qeybgalihii maqnaa la helay oo uu yimaado, waxaa la joojinayaa daryeelka u harayaasha, kaddib waxa la dheelli tirayaa mutaysiga hawlgabka ee da'da hawlgabka, iyadoo la tixgelinayo qaddarka daryeelka u hare ee la bixiyey.

**4) Daryeelka hawlgabka u hareyaasha ee hawlgabe geeriyoday ama shaqaale hawlgab leh:**

b) U harayaasha mutaystay waxay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku salaysan adeeg hawlgab leh ee ka qaybgale ama hawlgabe geeriyoodey. Xaqani waxaa uu ku kooban yahay xubnaha qoyska ee noolaa marka uu geeriyoonayey iyo ilmaha aan weli dhalan haddii ay dhashaan sagaal (9) bilood gudahood geerida hawlgabaha ama ka qeybgalaha ka dib.

t) Lamaane (lab iyo dheddig) ee ah u haraha hawlgabe ama ka qeybgale geeriyooday waxaa uu xaq u leeyahay daryeel hawlgab haddii guurka uu ahaa mid si sharciyan u jiray ka hor xilliga geerida ka qeybgalaha ama hawlgabaha. lamaane (lab iyo dheddig) ee ah u haraha geeriyooday, wuxuu waayayaa daryeel u hare haddii uu guur kale sameeyo. Bisha guurka kale dhacay ayaa noqonaynsa bisha ugu danbaysa ee la bixinayo daryeel u hare.

j) Ilmo hawlgabe ama ka qaybgale waxa uu xaq u leeyahay daryeel u hare, marka uu siddeed iyo toban (18) sano ka yar yahay, haddii uu wiil yahay, haddii ay gabar tahayna inta ay guursanayso.

x) Ilmaha da'diisu ka weyn tahay siddeed iyo toban (18) sano oo qabay naafannimo maalinta uu hawlgabuhu ama ka qeybgaluhu geeriyooday, wuxuu mutaysanayaa daryeel u hare ilaa inta uu naafanimadaas kasoo bogsoonayo. Guddigga caafimaadka ee ku shaqada leh ayaa si Sharcigan waafaqsan u xaqiijinaya in



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

naafanimadu ka hor istaagtay shaqo kasab leh.

kh) Ilmaha naafanimadu ku timaaddo geerida hawlgabaha ama ka qeybgalaha ka dib ma helayo daryeel u hare haddii uu siddeed iyo toban sano ka waynaa maalinta geerida.

d) Bisha uu ilmuhu gaaro siddeed iyo toban (18) sano ama uu ka soo kabto naafannimada ayaa noqon doonta bisha ugu dambaysa ee la siinayo daryeel u hare ilmahaas.

r) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay ilmaha siinaysaa daryeel u hare, ka dib marka lagu xaqiijiyo da'da ilmaha shahaadada dhalashada. Diiwaangelinta da'da ilmaha loo diiwaangeliyo daryeel u hare ayaa ah kama dambays sharci ah, mar danbana cidi kuma samayn karto dib u eegis sababtu waxay doontaba ha ahaatee.

s) Waalid kasta waxa uu xaq u leeyahay daryeel u hare, marka uu geeriyooday ka qeybgaluhu.

## 5) Aqoonsiga u harayaal dheeri ah:

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaa ay qoraal ahaan ku wargelinaysaa muddo soddon (30) Maalmood gudahood ah natiijada araajida qof kasta oo soo codsada daryeel u hare. Hase yeeshee, ogaysiiskaas oo jira ayaa u harayaasha kale ay ku soo codsan karaan daryeel u hare ilaa muddo sanad ah oo ka billaabmaysa maalinta uu dhintay ka qeybgabe ama ka qeybgale.

t) Haddii ay dhacdo in Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku ansixiso codsi horseedi kara in la dhimmo ama la baabi'iyo ogolaansho daryeel u hare oo Sanduuqu horay u siiyay u harayaal kale, Hay'ada Sanduuqa Hawlgabka waxay dib u xisaabinaysaa oo ay hadba sidii loogu baahdo u dhimmi doontaa daryeelka u hare ee la siinayo u harayaasha. Wixii dheeri ah ee la bixiyay waa la soo celinayaa si waafaqsan Sharcigan.

## 6) Qaddarka daryeelka u hare:

b) Haddii u haraha mutaystey uu yahay hal qof kaliya (xaas, ilmo ama waalid) daryeelka uu helayo u harahu waxaa uu noqonayaa 50% (boqolkiiba konton) wixii hawlgabaha geeriyooday uu heli jiray.

u) Haddii u harayaasha mutaystay (xaas, ilmo ama waalid) yihiin laba (2) qofood ama ka badan, waxaa ay helayaan wixii uu qaadan jirey hawlgabaha geeriyooday oo dhammeystiran, waxaana loogu qaybinayaa si siman.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7) **Dhimmasho ama waayid muteysiga qaatayaasha daryeel u hare:**

Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay joojinaysaa bixinta daryeel u hare kasta bisha uu geeriyoodo ama marka u hare uu waayo muteysigii daryeelka si waafaqsan Sharcigan. Marka u hare uu waayo muteysigii daryeelka u hare, qaddarka haray waxaa lagu sameynayaa dheelitir, iyadoo si siman loogu qaybinayo u harayaasha kale ee muteystay si waafaqsan faqrada 6aad ee qodobkan.

## Qodobka 9aad
## Muteysi La'aanta Daryeel Hawlgab Ama Liiltir Xukun Dartiis

1) Hawlgab iyo liiltir lagu abaal marin maayo (lama siinayo) shaqaale dawladeed oo shaqada looga saaray xukun maxkamadeed oo kama dambays ah, iyadoo lagu soo eedeeyey dambi ciqaabeed la xiriira ku xadgudub iyo ka faa'deysi awood xafiis si sharci darro ah sida: xatooyo xoolo dadweyne, lunsi, tuuganimo, khiyaano, musuqmaasuq iyo wax isdabamarin, iyo dambi kasta oo keena in laga joojiyo inuu qabto xil xafiis Dawladeed.

2) Shaqaale dawladeed ee lagu xukumay dembiyada lagu xusay Qodobka 9aad faqradiisa 1aad ee sare lagu xusay, waxaa la siinayaa lacagtii looga gooyay Hawlgab ama liiltir.

## Qodobka 10aad
## Iscasilid

**Shaqaalaha Dawladda ee shaqada iskood isaga casila:**

1) Lama siinayo daryeel hawlgab haddii uusan si xiriir ah uga shaqeyn adeeg hawlgab leh muddo 10 (toban) sano ama ka badan, uusanna gaarin da'ada hawlgabka.

2) Waxaa la siinayaa liiltir loo xisaabinayo 1 (hal) bil mushaarka aasaasiga ah sannad kasta oo uu si joogta ah uga shaqeeyey adeeg hawlgab leh muddo ka yar 10 (toban) sano, marka uu ka baxayo ama ka fariisnayo shaqada ama adeegga Dawladda. Waxaana lagu salaynayaa qiimaha liiltirka la siinayo mushaarka ugu dambeeya ee uu qaatay shaqaaluhu.

3) Waxaa la siinayaa qaddarka liiltirka oo dhammeystiran haddii shaqaaluhu uu gaaro da' aan ka yareyn 60 (lixdan) sano marka ugu danbeysa adeegga hawlgabka leh.

4) Shaqaalaha iska casila shaqada Dawladda ka hor da'da hawlgabka ahna mid muteysatay liiltir, wuxuu heli karaa xaqa liiltirka haddii uu iska casilo adeegga hawlkaba leh ka hor inta uusan gaarin da'da lixdan (60) jirka, iyadoo la raacayo shuruudahan hoose:

    b) Qaddarka liitirka waa la dhimayaa iyadoo lagu saleynayo da'da qofka shaqaalaha ah xiliga

    t) Uu iska casilayo adeegga hawlgabka leh sida ku cad shaxdan hoose:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

j) Hadii qofka shaqaalaha ahi iska casilayo adeegga hawlgabka leh da' iyadoo lagu saleynayo sida ku xusan Qodobka 10aad, faqradiisa 2aad, wuxuu qofku helayaa qaddarka boqolayda (%) liiltirkii uu heli lahaa oo ah sida soo socota:

i) Kayar 40 jir 70%

ii) U dhaxeysa 40 illaa 49 jir 80%

iii) U dhaxeysa 50 illaa 59 jir 90%

x) Qofkii iska casila shaqada ee qaata liiltirka ee haddana kusoo laabta adeegga hawlgabkaleh, wuxuu heli doonaa keydka sanadaha adeegga hawlgabka lahaa ee loo balan qaadayhaddii uu si buuxda usoo celiyo qaddarkii horey loogu siiyey liiltir ahaan muddo lix bilood gudahood ah marka uu dib ugu soo laabto adeegga hawlgabka leh.

## CUTUBKA SEDAXAAD
## HAY'ADDA SANDUUQA HAWLGABKA, DHIGAALKA IYO MAAREYNTA SANDUUQA

### Qodobka 11aad
### Sanduuqa Hawlgabka

1) Sanduuqa laga bixiyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka Dawladda ayaa waxaa lagu magacaabaa "Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka".

2) Sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka waxaa maamulaya "Agaasinka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda" Agaasinkaas oo ah hay'ad Dawladeed oo madax bannaan, lehna Agaasime Guud iyo Shaqaale u gaar ah, taas oo hoos tagaysa "Guddigga Kor joogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda". Hase yeeshee, siyaasad ahaan waxaa mas'uul ka ah Wasiirka ka masuulka ah Wasaaradda Shaqada, kuna matalaya Goleyaashada Dawladda. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka waxay u xilsaaran tahay uruurinta dhigaalka, maareynta hantida sanduuqa, maamulidda iyo bixinta daryeelka hawlgabka iyo liiltirka si waafaqsan Sharcigan.

3) Agaasinka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka waxay yeelanaysaa sifo sharci ah taas oo ka dhigaysa in:

b) ay wax dacweyn karto lana dacweyn karo;

t) geli karto heshiisyo ay ku hormarinayso fulinta hawlaha loo idmaday si waafaqsan Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

j) soo iibsan karto, la soo wareegi karto, haysan karto ama sii iibin karto hanti si waafaqsan Xeerka iibka iyo qandaraasyada Qaranka.

x) gelinta caymis ka dhan ah khasaare kasta oo ku imaan kara waxay ayadu mas'uulka ka tahay.

kh) soo amaahan karto illaa xad go'an oo lacag ah oo ay dawaladdu ogolaatay, si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda.

d) gudoomi karto deeq kasta oo agab ah ama lacag ah si waawafsan Sharcigan iyo xeernidamiyeyaasha ka farcami doona.

r) shaqaaleysiin karto shaqaalaha loogu baahdo gudashada waajibaadka hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

4) Sanduuqa hawlgabka waxa loo maamulayaa si waafaqsan Qodobka 13aad ee Sharcigan.

5) Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ah bixinta wixii gaabis ah haddii si uun ay u dhacdo in lacagta caddaanka ah ee sanduuqa hawlgabka u taal xisaabta bankiga dhexe ay dabooli weyso qaddarka lacageed ee sanduuqa laga rabo in uu ku bixiyo daryeelka iyo liiltirka billaha soo aaddan. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waa in ay ku wargeliso waqti habboon hay'adaha ay khuseyso, haddii nuqsaantaasi ay soo ifbaxdo ama la odoroso.

## Qodobka 12aad
## Qaddarka Dhigaalka Hawlgabka

1) Laga bilaabo taariikhda maalinta 1aad ee bisha ku xigta bisha uu dhaqangalo Sharcigan, shaqaale Dawladeed ee kasta oo ka shaqeeya adeeg hawlgab leh wuxuu bixinayaa boqolkiiba shan (5%) mushaarkiisa aasaasiga ah si uu uga qeybgalo daryeelka sanduuqa hawlgabka ee Sharcigan lagu ballan qaaday. Dhigaaaalkaas waxaa bil kasta laga jarayaa mushaarka qofka shaqaalaha ah, waxaana lagu shubayaa Xisaabta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka uga furan Bankiga Dhexe, sida uu amro madaxa hay'adda Agaasimaha Guud ee u xilsaaran maamulka sanduuqa hawlgabka.

2) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay bixinaysaa xaddi qaaraan lacageed oo u dhigma boqolkiiba shan (5%) mushaarka aasaasiga ah ee qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka dawladda oo ka shaqeeyo adeeg hawlgab leh, si loogu biiriyo daryeelka sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka sida sharcigan lagu ballan qaaday. Lacagta Dawladda waxaa laga bixinayaa madaxa ama madax xigeenka qoondada miisaaniyad sanadeedka Dawladda ee Sanduuqa Hawlgabka. Qoondada lacagta miisaaniyadda Dawladda ugu talagashay daryeelka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka looma wareejin karo, loomana adeegsan karo kharash miisaanyadeed kale ama ujeedooyin kale intaba.

## Qodobka 13aad
## Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liil-tirka

1) Shaqo ahaan, sanduuqa hawlgabka waxaa uu noqonayaa"Hay'ad Madax Bannaan" oo u madax bannaan hawl maalmeedkeeda iyo go'aamadeeda khuseeya arrimaha maamulka hawlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawadda, taas oo hoos imaanaysa "Guddigga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda" hase yeeshee, siyaasad ahaan waxaa mas'uul ka ah Wasiirka ka mas'uulka ah Wasaaradda Shaqada, kuna matalaya Goleyaashada Dawladda, qaab dhismeedka Hay'addan waxaa lagu faahfaahin doonaa Xeerhoosaad la soo saari doono.

2) **Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda:** Guddigga Korjoogteynta waxa uu ka kooban yahay (5) Shan xubnood oo kala ah:

   b) Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada – Guddoomiyaha.

   t) Wasiirka Wasaaraada Maaliyadda - Guddoomiye ku-xigeen.

   j) Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda – xubin, hase yeeshee waa qofka Seddexaad Shirguddomiya haddii labada wasiir ay shirka ka maqan yiihiin.

   x) Guddoomiyaha Ururka Shaqaalaha Rayidka Dawladda – Xubin.

   kh) Xoghayaha Ururka Shaqaalaha Rayidka.

   d) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waa xoghayaha Guddiga Korjoogte.

   b) Guddiga Horumarinta Addeega Bulshada Baarlamanka JFS ayaa korjoogteynayaan

   c) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka.

3) **Waajibaadka iyo Awoodaha Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka:** Guddigga Korjoogteynta waxaa ay korjoogteeyaan oo ay la soconayaan dhammaan arrimaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyada oo mas'uuliyadaha iyo awoodaha Guddiga Korjoogteynta ay ka mid yihiin:

   b) Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka lagu aaminay maamulka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, iyo guud ahaan hantida sanduuqa.

   t) Ansixinta qorshe hawleedka 5 (shan) sano ah oo lagu oddorosayo daryeelka Sunduuqa Hawlgabka Dawladda oo uu soo diyaariyo Agaasimaha Guud ee



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

maamulka Sanduuqa Hawlgabka isagoo la kaashanaya dhammaan hay'adaha ay khuseyso ee Dawladda.

j) Ansixinta miisaaniyad sanadeedka ku talagalka ah ee loo qoondeynayo Hay'adda iyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ka hor inta aan loo gudbin Goleyaasha Dawladda (Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka).

x) Korjoogteynta iyo hubinta ku ururinta dhigaalka xisaabta (Account) sanduuqa hawlgabka ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

kh) Magacaabidda Guddiga Joogtada Rafcaanka ee sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha Dawladda.

d) Ansixinta habraacyo sugan oo si waqtiyeysan loogusiiyo daryeel hawlgab iyo liiltir ka faa'iideystayaasha muteystay.

r) Guddiga Korjoogteynta waxaa uu diyaarinayaa ama uu amrayaa in la diyaariyo si uu ugu gudbiyo Golaha Wasiirada iyo Baarlamankaba xisaab celinta la baaray ama la hubiyey iyo dhammaan arrimaha xisaabaadka sanduuqa hawlgabka ee xiliyada kala duwan sida waqti ka waqtigii iyo markasta oo la loo baahdo.

s) Guddiga Korjoogteynta waxaa uu amrayaa in la diyaariyo in qiimeyn halis-hilaadin lagu sameeyo sanduuqa hawlgabka ugu yaraan seddexdii (3) sano ee kasta, iyadoo warbixintana ay noqonayso mid ay shaqaalaha iyo dadweynahaba heli karaan.

Sh) Hubiyaan in dawladdu ku kabto sanduuqa dhaqaale dheeraad ah marka sanduuqa hawlgabka nuqsaani ku timaaddo.

Dh) Guud ahaan wixii uu Guddigu u arko in ay lagama maarmaan u tahay dedejinta, socodsiinta, hanashada iyo ka mira dhalinta hawlaha Sanduuqa iyo ilaalinta xuquuqda ka qeybgalayaasha iyo Dawladda.

c) Ansixinta qaabdhismeedka Hay'adda Saduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Dawladda.

g) Sameynta qeybta hanti-dhawr gudaha ah.

f) Qorista iyo qiimeynta shaqaalaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka kuwaas oo noqonaya shaqaale rayid joogta ah, hannaanka shaqo qoristoodana waxaa loo marayaa habraaca shaqo qorista shaqaalaha rayidka dawladda, taasoo ah tartan u furan dhammaan muwadiniinta Soomaliyeed.

q) Sameynta Xeerhoosaadyada iyo habraacyada kale ee lagama maarmaanka u ah shaqooyinka hay'adda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

k) La xisaabtanka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda".

**4) Waajibaadka Maaliyadeed ee Guddiga Korjoogteynta: Guddiga Korjoogteynta waxaa waajib ka saaran yahay:**

b) Ku dhaqmidda si ay ku jirto daacadnimo iyo danta ugu wanaagsan ee Sanduuqa Hawlgabka si loogu maareeyo arrimaha maaliyadeed ee sanduuqa hawlgabka si hufan.

t) Hubiyaan ururinta dakhliga loogu talagalay sanduuqa hawlgabka si loo bixiyo xuquuqda hawlgabayaasha si waafaqsan sharcigan.

j) Xil iska saaridda waajibaadka ugu sarreeya ee ka saaran korjoogteynta, hubinta iyo ilaalinta hantida iyo diiwaannada sanduuqa hawlgabka.

x) Mas'uul ka yihiin adeegsiga iyo illaalinta nidaam wax ku ool ah, hufan oo lagu maareeyo nidaamka maaliyadeed ee sanduuqa hawlgabka iyo xakameynta khataraha oo ay ku jiraan nidaamka xisaabaadka iyo hantida sanduuqa hawlgabka.

kh) In ay ka hortagaan, joojiyaan haddii ay jiraan ku takrifal kharashaad aan caadi ahayn oo aan miro dhal u lahayn hawlaha hay'adda sanduuqa hawlgabka kuwaas oo aanan waafaqsaneyn siyaasadaha hawlgelinta ee sanduuqa hawlgabka.

d) Ansixinta iyo soo jeedinta dib u eegis miisaaniyad sanadeedka sanduuqa hawlgabka haddii loo baahdo si maamulka hay'adda sanduuqa hawlgabka ugu gudbiso Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale oo ay khuseyso.

r) Hubiyaan wax soo iibsiga iyo wax iibinta Agaasinka iyo Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka si waafaqsan Xeerka Iibka Qaranka si loo xaqiijiyo ku dhaqanka daahfurnaan, isla xisaabtanaka, tartan furan iyo caddaalad, iyada oo aysan hay'ddu marna isticmaali karin lacagta dhigaalka ah oo loogu tala galay hawlgabka, (10%), sida ku xusan qodobka 12aad faqraddiisa 2aad ee sharcigan.

s) Xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta in aysan ku dhaqmi karin hab ka baxsan waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha Guddiga Korjoogteynta lagu siiyey sharcigan, sida adeegsiga awood uusan siin sharcigan, bixinta macluumaadka sirta ah ee xubnaha Gudigga Korjoogteynta ay ku helaan mas'uuliyadda ka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

saaran Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka taas oo si aan habbooneyn loogu faa'iidaynayo dhinac kale oo masaalix ka leh Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

**5) Ka fogaanshaha danaha isdiidan ee Xubnaha Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka waa in ay caddeeyaan wixii dano isdiidan ah ee ka hor imaanaya hawsha ama shaqada loo xilsaaray si waafaqsan sharuucda iyo siyaasadaha ku aaddan dhaqanka saraakiisha sare ee dawladdu magacawdo.

t) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta waa in ay shaaciyaan wixii dano isdiidan ah ka hor imaanaya go'aanadooda. Guddiga Korjoogteynta waa in uu yeeshaa siyaasad lagu maareeyo danaha isdiidan ee jiri kara marka uu gudigu gudanayo waajibaadyadiisa si waafaqsan sharcigan.

j) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta waxaa ka reeban hadiyad ama deyn oo ka timaada maamulaha hantida sanduuqa, ilaaliyaha hantida sanduuqa ama adeeg bixiye la macaamila Hay'adda Hawlgabka Sanduuqa, ama dhinac kale oo xiriir shaqo kala dhaxeeyo dhammaan maamuleyaasha hay'adda iyo hantida sanduuqa hawlgabka. Mamnuuciddani waxay saameyneysaa sidoo kale, xaaska, walaalaha, waalidka iyo carruurta xubinta Guddiga Korjoogteynta. Haddii xubin ka tirsan Guddiga Korjoogteynta uu aqbalo, gudoomo arrimaha kor lagu xusay, xubin kaas waxaa looga baahanaanayaa inuu si degdeg ah isu casilo, haddii uu san keenin wax lagu qanci karo ee uu isku difaacayo.

x) Xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta kama qaban karo wax xil shaqo ah sida jagooyinka: Maamulaha hantida sanduuqa, ilaaliyaha hantida sanduuqa, muddo hal sano ah ka dib marka ay dhamaato muddada xil haynta xubinka Guddiga Korjoogteynta.

**6) Magacaabista Agaasinka Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Iyadoo la tixraacayo Dastuurka JFS qodobadiisa ku saabsan magacaabista xilalka saraakiisha sare ee dawladda iyo xeernidaamiyeyaasha kale ee maamulka shaqaalaha rayidka dawladda, Wasiirka Wasaaradda Shaqada ayaa Golaha Wasiirrada u soo jeedinaya Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda, ka dib marka uu Goluhu oggolaado,waxaa si rasmi ah u magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka dibna waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

t) Shuruudaha iyo xaaladaha Magacaabista Agaasimaha Guud waxay ku imaanaysaa si wafaaqasan Xeernidaamiyaha 6aad ee Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka Dawladda, gaar ahaan Qodobada 32aad, 33aad iyo 34aadee Xeernidaamiyeyaasha Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

j) Agaasimaha Guud ee Xafiiska Sanduuqa Hawlgabka wuxuu si toos ah ugu warbixiyaa Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

7) **Xil ka qaadista, Shaqo kajoojinta ama Iscasilidda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka:** Agaasimaha Guud ee Xafiiska Sanduuqa Hawlgabku wuxuu ku waayi karaa xilka xafiiska haddii:

b) Gudigga Korjoogteynta Hay'adda ay soo jeediyaan xil ka qaadis, Wasiirka u xilsaaran Wasaaradda Shaqada uu ku qanco soojeedinta Guddiga Korjoogteynta, iyadoo sabab looga dhigayo anshax xumo, ku xadgudub awoodeed, xatooyo xoola dadweyne ama ay caddaato inuusan laheyn karti, aqoon iyo awood uu si xilkasnimo leh ugu guto waajibaadkiisa shaqo ee xafiiskiisa.

t) Wasiirka Wasaaradda Shaqada wuxuu shaqada ka joojin karaa Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka isagoo latashanaya Gudigga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo LiiltirkaShaqaalaha Rayidka Dawladda, haddii uu wasiirku ku arko agaasimaha arrimaha ku xusan isla faqraddaan 7aad, xarafka (a) ee qodobkan.

j) Haddii uu go'aansado Agaasimaha Guud in uu si iskiis ah isaga casilo xilka, waa in uu muddo seddex bilood ka hor ah u soo gudbiyaa Gudigga Korjoogteynta qoraalka rasmi ah oo uu ku dalbanayo in uu xilka ka tagayo.

8) **Waajibaadka shaqo iyo Awoodaha Agaasinka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:** Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka wuxuu leeyahay awoodaha iyo waajibaadkan si waafaqsan sharcigan, si guudna shaqooyinkiisa iyo awoodihiisa waxaa kamid ah kuwaan hoos lagu qeexay:

b) Ugu adeego isagoo ka wakiil ah maamulka iyo amaanada hantida Sanduuqa.

t) Abuuridda ama ka furidda Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Xisaab banki oo ay gaar u leedahay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, taas oo lagu bixin doono Dhigaalka iyo waliba deeqaha haddii ay bixiso Dawladda ama deeq bixiyeyaal kaleba.

j) Xakameynta, maamulidda dhigaalka Sanduuqa Hawlgabka, hantida Sanduuqa oo si khaas ah oo kaliya uga faa'iideysanayaan ka qeybgalayaasha iyo u hareyaasha Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

x) Diyaarinta miisaaniyadda sanadeedka Hay'adda Sanduuqa ee si ay u ansixiyaan Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kh) Uruurintinta iyo xaqiijinta Dhigaalka sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka ee ay bixinayso dawladda iyo ka qaygalayaasha.

d) Diyaarinta iyo haynta hantida sanduuqa.

r) Dabbaqidda maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka ee Xisaabta keydka si waafaqsan sharcigan.

s) Haynta diiwaanada macluumaadka ka qeybgalayaasha, hawlgabeyaasha iyo u hareyaasha oo ay ku jirto balse aanan ku koobneyn xogta shakhsiyadeed ee ka qeybgalayaasha, tiradooda, ciwaanadooda, xogta adeegga hawlgabka leh, xogta daryeelka hawlgabka, xubnaha qoyska noqonkara u hareyaal iyo dhammaan macluumaadka kale oo looga baahnaanayo in lagu xisaabo bixinta daryeelka si waafaqsan sharcigan.

sh) Sameynta qiimeynta halis-hilaadin xililyeysan ee Sanduuqa hawlgabka si soo jeedinno ku saleysan qiimeynta halis-hilaadinta loogu gudbiyo Baarlamaanka. Sameynta daraasada qiimeynta waa in lagu fuliyaa iyadoo laga shidaal qaadanayo nolol cimriyeedka (life expectancy) tirada hawlgabka dadka Soomaaliyeed. Haddii xogta noocan ahi aanan la heleynin, shaxda nolol cimrayeedka dal leh xog dhammeystiran oo ah mid la mid ah astaamaha dadweynaha sida: dakhliga, xadigga dhimmashada iyo dhammaan isirrada ama arrimaha kale ee ay tahay in la tixgeliyo.

dh) Geli karo heshiisyo uu ku iibsanayo qalab iyo agab xafiiseedyada lagama maarmaanka u ah hawlaha shaqo ee sanduuqa hawlgabka si wafaqsan sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

c) In uu heshiiyo la galo Halis-odreseyeyaal hanti, xisaabiyeyaal, hantidhowreyaal, adeeg bixiyeyaal kale haddii loo baahdo, kuwaas oo ay ansixinayaan Guddigga Korjoogteynta.

g) Agaasimaha Sanduuqa wuxuu awood u leeyahay in uu soo jeediyo qaabdhismeedka iyo shaqaalaha kaaliyeyaasha ah ee maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, kuwaas oo ka mid ah shaqaalaha rayidka ayna ansixiyaan Gudigga Korjoogteynta.

f) Qandaraas kula geli karaa, wax ka mid ah shaqooyinka Sanduuqa Hawlgabka, qof ama shirkad leh khibrad ku aadan shaqada lagu siinayo khandaraas hoosaadka, haddii ay maalgelinayso daraf ka kale oo dibadda ah.

q) Go'aaminta waqti ka waqti, haddii qof uu muteystay ama uusan muteysan daryeel faa'iido leh ama mid aan faa'iido lahayn ka helayo Sanduuqa Hawlgabka.

k) Ka bixinta Sanduuqa Hawlgabka abaalmarinada daryeelka si waafaqsan

Sharcigan.

l) Bilaabidda, qaadida ama difaacidda wax kasta oo dacwado ah oo laxiriira Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ama go'aaminta wixii xuquuq kasta ah ee ka qeybgalayaasha iyo kuwa kale ee sharciga dhexdiisa xaq lagu siiyey, marka laga reebo dacwadaha Maxkamadaha hortooda yaalla.

m) Dabbaqidda iyo hirgelinta habraacyaya iyo Xeer hoosaadyada Hay'adda oo ay ansixiyaan Gudigga Korjoogteynta

n) Sameynta iyo ku dhaqanka habraacyo u gaar ah shaqooyinka ama maamulka gudaha ee hay'adda Sanduuqa Hawlgabka marka ay ansixiyaan Guddiga Kor joogtaynta.

w) Gudashada si guud ahaaneed dhammaan ficillada ama waxyaabaha laga maarmaanka noqon kara ama faa'iido iyo wanaag ugu jiri karto haynta iyo ilaalinta Sanduuqa Hawlgabka iyo xuquuqda ka qeybgalaha iyo dawladdaba.

**9) La Xisaabtanka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Guddigga Korjoogteynta marka uu gudanayo waajibaadkiisa shaqo, waxaa la xisaabtami kara Golaha Wasiirada, Baarlamaanka, Hanti Dhowraha Guud, ka qaybgalyaasha, u hareyaasha sanduuq.

t) Marka uu shaqooyinkiisa gudanayo, Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka, waxaa la xisaabtami kara Guddiga Korjoogteynta, Hantidhawrka Guud ee Qaranka, Golaha Wasiirrada, Baarlamaanka, ka qaybgalayaasha, hawlgabayaasha iyo u hareyaasha Sanduuqa Hawlgabka.

j) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ayaa leh mas'uuliyadda maamulka guud iyo maamulka hawl maalmeedka hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka, waxayna hay'addu xifdinaysaa, ilaalinaysaa, xasuus-reebeysaa dhammaan xogaha, macluumaadka, buugaagta, diiwaanada iyo xisaabaadka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka.

**10) Maalgelinta Hantida Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka:**

b) Haddii ay dhacdo ama marka Sanduuqa Hawlgabka ay ku jirto kayd lacageed oo dheeraad ah, loona baahdo in maalgelin lagu sameeyo, Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa in uu Dawladda u soo jeediyaan talo si loo diyaariyo Siyaasad maalgelin iyo xeer u gaar ah maalgelinta hantida Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda kuwaas oo laga ansixinayo Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka.

t) Hantida Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ee dheeraadka ku ah xisaabta keydka ah, Bankiga dhexe waa in si taxadar leh loo maalgeliyaa, iyadoo la raacayo mabaadi'da mas'uuliyadda, maamul wanaagga iyo islaxisaabtanka hufan si ay uga faa'iidaystaan oo keliya ka qeybgalayaasha Sunduuqa Hawlgabka iyo u hareyaasha muteystay, iyada oo la raacayo shuruudaha sharcigan.

j) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Sanduuqa Halwgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda, waa in ay sameeyaan siyaasadda maalgashiga taas oo marka ay ansixiyaan Goleyaasha Dawladda loo adeegsan karo maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka iyadoo lagu salaynaya talo bixin ku dhisan aqoon mihnadeed, waafaqaysna mabaadi'da ku xusan Sharcigan soona bandhigaysa.

i) In si foojigan looga fiirsado noocyada ganacsi ee u qalma in la maalgaliyo iyo heerarka khatarta la aqbali karo ee hantida hawlgabka laga yaabo in lagu maalgelinkaro ama aan la maalgelin karin.

ii) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa in ay go'aan masiiri ah ka qaataan arrimaha la xiriira maalgelinta hantida hawlgabka iyaga oo loo raacayo siyaasadda iyo Xeerka Maalgashiga Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Dawladda.

iii) Habraaca iyo hannaanka go'aannada waa in ay ku salaysnaadaan Siyaasadda Maalgashiga Hawlgabka iyo Liiltirka, Xeerkan, Xeernidaamiyeyaasha iyo habraacyada kale ee Hawlgabka iyo Liiltirka.

iv) Waa in uu jiraa habraac lagu aqoonsado, lagula socon karo, laguna maareyn karo dhammaan khataraha ka imaan kara maalgelinta maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

v) Habka lagula soconayo u hogaansanaanta Maamulayaasha Sanduuqa Hawlgabka ee Siyaasadda maalgashiga.

vi) Iyo xeerhoosaadyadii iyo nidaamyadii kale ee ay u arkaan Guddigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka in ay laga maarmaan u yihiin la socodka arrimaha malgashiga Sanduuqa Hawlgabka.

x) Iyado oo uu la tashanayo Gudigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda, Wasiirka ka mas'uulka ah Wasaaradda Shaqada ayaa Golaha Wasiirrada horgeynaya Siyaasadda Maalgashiga hantida hawlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda si ay u ansixiyaan.

kh) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dalwadda ayaa si joogta ah warbixin uga siinaya Goleyaasha Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka iyo dadweynaha xaddiga maalgalinta hantida hawlgabka iyo faa'iidooyinka ama khasaarooyinka laga dhaxlay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Hantida dheeraadka ah ee Xisaabta Keydka Sanduuqa Hawlgabka waxa lagu maalgelin karo waxaa ka mid ah sida:

i) Qoraalada ballanqaadka ah ee ay soo saarto dawladda Faderaalka ee Soomaaliya kuwaas oo dammaanad qaadaya isla markaana leh xadiga soo celinta maalgashiga la aqbali karo.

ii) Dhigashada ama ku keydsi banki.

iii) Hantida kale ee maaliyadeed ee lagu kala iibsado suuqyada raasumaalka ee dhisan oo lagu qiimeyn karo ujeedooyinka xisaab soo celinta maalgashiga.

r) Saamiyada ganacsi ee damaandaha gudaha leh ee la maalgashan karo waxaa ka mid ah:

i) Xisaabaadka iyo keydka ama dhigaalka bankiyada ee shirkadaha shatiga ka haysta Bankiga Dhexe, kuwaas oo aan khatar ugu jirin tallaabo ka qaadis ku wajahan hakin ama kala laabasho shatiyadooda ganacsi.

ii) In maalgelintu waafaqsanaantaa damaanadda ay dawladdu bixiso iyo xadiga damaanadda ee la ogolyahayba.

s) Saamiyada caalamiga ah oo lagu soo saaro xeerar caalamiyan loo aqoonsan yahay lehna bankiyo, suuqyada raasumaal maaliyadeed ee sharciyeysan kuwaas oo ay ka mid noqon karaan:

i) Keydka ama dhigaalka shirkada haysta qiimaynta sumcada darajada maalgashiga ugu sarraysa ee ay qiimeeyeen ugu yaraan laba ka mid ah shirkadaha qiimaynta caalamiga ah ee ugu sumcadda badan.

ii) Saamiyada ganacsi ee dammaanadda leh ay soo saartay dawladda ilaa xadka damaanadda la ogolyahay, saamiyada detnta ah ee leh hanti u baahan lacag bixin go'an taas oo bixiyaha ay tahay inuu leeyahay qiimeyn la mid ah sida tan faqrada sare lagu xusay.

iii) Saamiyada ganacsi ee dammaanadda leh kana diiwaangashan suuqyada raasamaalka leh ee sharciyeysan kuwaas oo saamiyadooda lagu iibiyo si furan ama suuqyada la aqoonsanyahay ee saami kala iibsiga shardina ay u tahay inay hoos tagaan hay'daha sharci ahaan xeeriya suuqyada saamiyada.

iv) Maalgelin ay isla oggol yihiin dhinacyada maalgelinaya shardina ay u tahay oggolaanshaha iyo ansixinta hay'ad sharci ahaan xeerisa maalgashiga dhinacyada.

sh) Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka reebanaan kara inaan lagu maalgelin arrimahan soo socoda sida:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

i) Saamiyada dammaanadaha leh balse aan ku jirin liiska suuqa saamiyada lagu kala iibsado amaba aanan si furan loo kala iibsan.
ii) Hantida aan la sii iibin karin amba si kale hadii la yiraahdo aanu sharcigu oggoleyn.
iii) Hantida ma guurtada ah.
iv) Hantida (agab ahaaneed) ee aan ku jirin liiska suuqyada saamiyada sharciyeysan kuwaas oo aan qiimeyntooda la hubin, oo ay ku jirto tusaale ahaan, laakiin aan ku xaddidnayn, waxyaalaha qadiimiga ah, farshaxanka, qadaadiicda iyo gaadiidka ama baabuurta.

v) Hanti kasta ama saami ganacsi oo damaanad leh oo uu bixinayo, iibinayo xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha rayidka, Maareeyaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka iyo, Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka ama shirkado ganacis oo xiriirka la leh ama qaraabadoodaba, iyo hanti kasta oo kale oo uu bankiga dhexe u aqoonsaday in aan la maalgashan karin.

dh) Hantida Sanduuqa Hawlgabka lagama soo iibsan karo ama lagama iibin karo xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka, Maareeyaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka iyo Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka ama shirkado ganacis oo xiriirka la leh ama qaraabadoodaba.

## 11) Magacaabista iyo Waajibaadka Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka (Pension Fund Custodian):

b) Haddii wax maalgashi ah lagu sameynayo hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda oo aan ka ahayn Siyaasadda Maalgashiga Dawladda FederaalkaSoomaaliya ay qaadatay, si waafaqsan sida lagu xusay faqradda (10)(d)(i), ee Qodobkan,ama ku keydsiga/dhigasho bankiyada Soomaaliya gudaheeda ah,sida lagu xusay faqradda (10)(d)(ii) ee Qodobkan,Guddiga Korjoogteynta Hantida Sanduuqa Hawlgabka wuxuu sameeyaa, dhaqangaliyaana siyaasadda maalgashiga sidoo kalena uu raadiyo talo bixinada maal-gelineed oo ku saleysan mihnad- yaqaanimo. Marka ay timaado maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka, Guddiga Korjoogteynta waxaa uu awood u leeyahay in uu magacaabo Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka, iyadoo loo marayo habka shaqo qorista oo tartan daahfuran ah, isla markaana laga qaadan karo gudaha shaqaalaha rayidka dawladda ama laga keeni karo bannaanka

t) Waajibaadka Illaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka mid ah:
i) Haynta iyo ilaalinta hantida Sanduuqa Hawlgabka sida; dheefta daryeelka hawlgabayaasha, U hareyaasha, liiltirka Shaqaalaha iyo dhammaan hantida uu maagaliyo Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda

ii) Gudoomidda, Ilaalinta iyo la socdo Hantida Sanduuqa Hawlgabka ee la maalgelinayo iyo inuu salka u dhigo dhammaan hawlaha dhaqdhaqaaqa la



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

xiriira ganacsiga iyo maamulka maalgashiga Sanduuqa Hawlgabka oo ay ku jiraan uruurinta faa'iidooyinka laga helay saami qeybsiga hantida uu maal-geliyo Sanduuqa Hawlgabka.

iii) Waa inuu si joogtaa ula socdaa dhammaan dhaqdhaqaaqa xisaabaadka ganacsiga, maalgashiga iyo faa'iidada saamiyada iyo wax kasta oo la xiriira wax kala iibsiga maalgashiga hantida sanduuqa hawlgabka

iv) Warbixin joogta ah ka siiyo Guddiga Korjoogtaynta iyo Agaasimaha Guud isagoo la socodsiinayo dhammaan arrimaha la xiriira hantida sanduuqa hawlgabka ee uu wakiilka uga yahay la socodkeeda iyo ilaalinteeda.

v) In uu sameeyo falanqayn xisaabeed ku saabsan maalgashiga iyo faa'iidada laga filayo inay kasoo laabato maalgashiga Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo ilaalinteeda, sidoo kalena, in uu warbixin 3 (seddex) billoodle ah ama marka loo baahdo ka siiyaa Agaasimaha Guud iyo Guddiga Korjoogtaynta dhammaan xogaha iyo macluumaadka la xiriira maalgashiga iyo ilaalinta hantida sanduuqa hawlgabka.

vi) Fulinta go'aannada, qorsheyaasha iyo hawlaha ay meel-mariyaan ama ansxiyaan Guddiga Korjoogtaynta Sanduuqa Hawlgabka ee khuseeya maalgashiga hantida sanduuqa hawlgabka shaqaalaha Dawladda.

j) Ilaaliyaha sanduuqa hawlgabka waa in si joogta ah u ilaaliyaa dhammaan hantida sanduuqa hawlgabka, isagoo fulinaya go'annaanada Guddiga Korjoogtaynta Sanduuqa Hawlgabka. Ilaaliyaha sanduuqa hawlgabka, waxaa ka reeban in uu si shakhsi ah, dangaar ah uga faa'iidaysto, u isticmaalo hantida hawlgabka ee uu mas'uulka ka yahay isagoo ku raadinaya dano dhaqaale ama wax kastaoo saameyn ku yeelan kara go'aan qaadashada ilaaliyaha sanduuqa.

## 12) Magacaabista iyo Waajibaadka Agaasimaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka:

b) Haddii wax maalgashi ah lagu sameynayo hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda oo aan ka ahayn Siyaasadda Maalgashiga Dawladda Federaalka Soomaaliya ay qaadatay si waafaqsan sida lagu xusay faqradda(10)(d)(i) ee qodobkan ama ku keydsiga/dhigasho bankiyada Soomaaliya gudaheeda ah sida lagu xusay faqradda (10)(d)(ii) ee Qodobkan, Guddiga Korjoogteynta Hantida Sanduuqa Hawlgabka waa inuu sameeyaa dhaqan-galiyaana siyaasadda maalgashiga, sidoo kalena uu raadiyo talo bixinada maal-gelineed oo ku saleysan mihnad yaqaanimo. Marka ay timaado maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka, Guddiga Korjoogteynta waxaa uu awood u leeyahay inuu magacaabo Maareeye ama Maareyeyaasha Maaliyadeed ee Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyadoo loo marayo habka shaqo qorista oo tartan daah furan ah kuwaas oo laga qaadan karo gudaha shaqaalaha rayidka Dawladda amaba laga keeni karo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

banaanka.

t) Waajibaadka Maareeyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka mid ah:

i) dabaqida ama adeegsiga, maareynta iyo la socodka dhammaan ama qeyb ahaan hantida sanduuqa sida lagu oggolaaday siyaasadda maalgelinta ee sanduuqa.

ii) inuu maalgeliyo Hantida Sanduuqa Hawlgabka si waafaqsan siyaasadda maalgashiga ama qodobbada Xeerka Maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka haddii la dhaqangeliyo.

iii) in uu warbixin joogta ah siiyo Guddiga Korjoogtaynta iyo Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda macluumaadyada ku saabsan istiraatijiyadda maalgashiga, odoraska laga filayo faa'iido soo celinta maalgelinta iyo halbeegyada kale ee tilmaameyaasha u ah horumarka iyo waxqabadka hawlaha maalgalinta.

iv) ka baaraandagidda dhammaan arrima maalgashiga, iyadoo lala kaashanayo lana marsiinayo Ilaaliyaha Sunduuqa Hawlgabka.

v) in uu qabto hawl kasta oo kale uu loogu xilsaaray hagayaal kale oo ayuu soo saarto Sanduuqa Hawlgabka.

j) Maareeyaha Sanduuqa waa in loo magacaabaa si waafaqsan heshiis waana inuu ilaaliyaa raasamaal maalgashiga ee Sanduuqa Hawlgabka, bixiyana damaanad qaad ku filan iyo caymis ka dhan ah khatarta hawlgalineed ee ka dhalan karta arrimaha maalgashiga, iyadoo la raacayo sida ay go'aamiyaan Gudigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

x) Maamulaha Sanduuqa Hawlgabka waxaa looga baahan yahay inuu si xirfadaysan u odoroso, una doorto si uu u kordhiyo nooca ugu faa'iido soo celinta sarreeya maalgashiga Sanduuqa Hawlgabka, si waafaqsan Qodobbada Sharcigan, Siyaasadda maalgashiga ee Hantida Sanduuqa iyo Xeernidaamiyeyaasha Saduuqada Hawlgabka Shaqaalaha Dawladda.

## CUTUBKA AFARAAD
## QODOBBO QUBANE AH

### Qodobka 14aad
### Araajida Daryeelka Hawlgabka

1) Go'aanka gaarista daryeelka:

b) marka ka qeybgale ama u hare uu ka codsado daryeel maamulka Sanduuqa Hawlgabka, maamulka Sanduuqa Hawlgabku waa in uu si qoraal ahaan ku ogeysiiyaa natiijada



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

codsade kasta muddo 14 (toban iyo afar) maalmo shaqo ah gudahood, laga billaabo maalinta qabashada arjiga.

t) haddii maamulka Sanduuqu uu arjiga u diido dukumiinti ka maqan dartiis, maamulka Sanduuqa wuxuu codsadaha iyo hay'adda ay khuseyso qoraal ku wargelinayaa 14 (toban iyo afar) maalmo shaqo ah gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta arjiga la qabtay. codsaduhu sanduuqa ayuu xogwaraysan karaa inta aan muddadaas la dhaafin.

j) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay soo saaraysaa shuruudaha araajida iyo habraacyadooda ugu dambeyn muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah, laga billaabo dhaqangalka Sharcigan, Golaha Wasiirraduna soo saaro Xeernidaamiyeyaasha Sharcigan.

2) Go'aaminta da'da:

b) qof kasta oo loo qoro shaqada Dawladda, inta uusan billaabin shaqada, waa in uu keenaa caddayn qoraal ah oo uu ku caddaynayo taariikhda dhalashada, isagoo keenaya shahaado dhalasho ama dokumeenti kale oo la aqoonsan yahay oo xaqiijinaya taariikhdiisa dhalashada.

t) haddii la caddeynwaayo taariikhda dhalasho ee shaqaale Dawladeed, maamulka Sanduuqa Hawlgabku wuxuu aqbalayaa shahaadada qiimaynta da'da ee ay soo saareen Guddi Dhakhaatiir ah oo aqoon u leh.

3) Racfaan qaadashada:

b) Dadka ka cabanaya go'aannada maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, waxay racfaan u qaadan karaan Guddi Racfaan oo joogto ah oo ay magacaabaan Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka.

t) Racfaan kasta waa in go'aan looga gaaro muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah laga billaabo qabashada arjiga racfaanka.

j) Go'aannada Guddiga Joogtada ah ee Racfaanka kamadambeys ayey ka noqonayaan dhanka Sanduuqa, waxaase racfaan looga qaadan karaa maxkamad awoodda u leh arrinkaas.

## Qodobka 15aad
## Ka qeybgale la waayey

1) Iyadoo aan loo eegeyn waxkasta oo xeer kale ah ee arrintan lid ku ah, haddii la xaqiijiyo in Ka qeybgale la waayo muddo 3 (saddex) sano ah, isla markaasna dadkii ay ahayd sida caadiga ah in haddii uu noolyahay ay war ka hayaan aanay muddadaas war ka helin, waxaa loo aqoonsanayaa inuu dhintay, waloow taas la burin karo, waxaana loo raacayaa daryeelka qodobbada Sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 16aad
## Waayitaanka iyo Hakinta Daryeelka Hawlgabka

1) Haddii shaqaale Dawladeed oo Sharcigan loogu oggolaaday daryeel hawlgab, ay Maxkamad awood u leh xabsi kamadambeys ah ku xukunto, iyadoo cuskaneysa dambiyada lagu xusay qodobka 9aad faqradda (1) ee Sharcigan, geysashada dambiyadaas dardeed isagoo kujira shaqada Dawladda, wuxuu waayayaa daryeelka hawlgabka.

2) Haddii shaqaale Dawladeed oo hawlgab loogu oggolaaday si waafaqsan Sharcigan, lagu xukumo dembi kama dambays ah oo ka dhan ah qarannimada Dawladda Soomaaliya, iyadoo loo cuskaday Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo ciqaabtiisu tahay dil, xabsi daa'in, ama xabsi 10 (toban) sano ah iyo wixii ka badan, wuxuu isla markaaba waayi doona xaddiga lacageed ee ku xusan qodobka 12aad faqraddiisa 2aad ee sharcigan.

3) Haddii shaqaale Dawladeed oo loogu oggolaaday daryeel hawlgab si waafaqsan Xeekan, ay maxkamad awood u leh xabsi ugu xukunto dambi aan ahayn kuwa ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan, haddii xabsigaasi uu keenayo in shaqaalahaasi uu si kumeelgaar ah muddo ka maqnaado shaqada Dawladda sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, sanduuqa hawlgabku wuxuu si kumeelgaar ah uga joojinayaa daryeelka hawlgabka shaqaalahaas rayidka ah inta uu ku jiro xabsiga ama ay dhammaanayso muddadii loo cayimay.

## Qodobka 17aad
## Diiwaangelinta iyo Bixinta Dhigaalka Hawlgabka

1) Dhigaalka hawlgabka: Si waafaqsan Sharcigan, shaqaale kasta oo rayid ah waxa waajib ah in laga jaro mushaarkiisa dhigaal hawlgab bil kasta, laguna shubo Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe, sidoo kale, Dawladda waxaa waajibku ah in ay ku shubto Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe dhigaal hawlgab uu dhigma bil kasta inta shaqaalaha laga jaray dhigaal kaas oo ay maamulayso Hay'adda Sanduuqa Halwgabka.

2) Bixinta daryeelka hawlgabka: Golaha Wasiirrada wuxuu soo saarayaa xeernidaamiyeyaal iyo habraacyo lagu maamulo bixinta daryeelka Hawlgabka iyo liiltirka muddo 90 (sagaashan) maalmood gudohooda ah, laga billaabo dhaqangalka Sharcigan, isagoo qeexaya:

   b) Nidaam iyo qaabab ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ay dhigaalka Dawladda iyo kan Ka qeybgalayaasha bil kasta ugu gudbinayso Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe Soomaaliya.

   t) Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda waxaa ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka la wadaagayaan dhammaan xogta iyo macluumaadka khuseeya



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

hawlgabeyaasha. Qaabka macluumaad wadaaggu wuxuu noqon karaa mid warqad ama danab ah (electronic).

j) Biixinta ugu horeysa ee daryeel hawlgab ama liiltir sida Sharcigani qabo waa inaysan kaddib marin muddo lix bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikha uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan.

3) Xog keydinta iyo xusuus dhowrka sanduuqa hawlgabka:

b) Galalka gaarka ah ee hawlgablayaasha waxaa la gelinayaa xog sugan oo la xiriirta dhigaal lagu shubayo xisaabta sanduuqa iyadoo loo kala soocayo ghigaalka ka qeybgalaha laga jaray iyo kan Dawladdu bixisay. Sanduuqa hawlgab ku wuxuu ku tiirsanaanayaa xogta iyo macluumaadka ay bixiyaan hay'adaha Dawladda, gaar ahaan Guddiga Dhigaalka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

t) Wasaaradda Maaliyadda iyo dhammaan hay'adaha kale ee Dawladda waxa laga rabaa inay raacaan Xeernidaamiyeyaasha Maamulka Sanduuqa iyo habraacayada la socda si maamulka loo hagaajiyo.

4) Korjoogteynta iyo baarista Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka: Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka wuxuu u idman yahay, mas'uulna ka yahay in uu baaro, qiimeeyo in maamulka Hay'adaha Sanduuqa Hawlgabka ay u hirgelinayaan bixinta dhigaalka iyo daryeelka si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 18aad
## Oggolaanshaha Hawlgabka iyo Liiltirka

1) Dhammaan tallaabooyinka la xiriira arrimaha hawlgabka iyo liiltirka ee Sharcigan lagu xusay, waxaa ogolaanaya madaxda hay'adaha kala duwan ee awoodda u leh si waafaqsan Sharcigan.

2) Sanduuqa hawlgabku wuxuu billaabayaa bixinta daryeelka hawlgabka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa marka uu Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka ansixiyo qoondada daryeelka hawlgabka ugu jirta miisaaniyad sannadeedka Dawladda ee la ansixyey.

3) Lacagta daryeelka hawlgabka iyo liiltirkaba waxaa kaliya oo lagu bixin karaa xisaabaha bankiyada (bank accounts) iyo xawilaadaha danabeysan, marnaba lama oggolo bixinta lacag caddaan ah.

4) Taariikhda dhaqangalka hawlgabka waxay noqonaysaa marka uu ka qeybgaluhu soo buuxiyo shuruudaha Sharcigan lagu xusay, daryeelka hawlgabkii baaqday waxaa dib loo bixinayaa marka uu ka qeybgalahu muteysto.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 19aad
## Wareejin ama Magacaabid Daryeel Hawlgab iyo Liiltir

1) Looma wareejin karo, loomana magacaabi karo daryeel hawlgab ama liiltir cid kale oo aan Sharcigan gudihiisa loogu oggolaan.

2) Daryeelka hawlgab kaas ama liiltirkaas lama geyn karo Maxkamadaha si loogu qabsado ama loogu gudo dayn ama wax kasta oo sheegasho ah oo ay Dawladda ama dad gaar ahi ku leeyihiin muteysataha.

## Qodobka 20aad
## Tilmaamaha Sicir Bararka

1) Hawlgab ama daryeel U hare kasta oo Sharcigan loogu oggolaaday shaqaale Dawladeed waa in sannad kasta lala kordhiyo kororka maciishadda hadba sida ay tahay dib u eegista Bankiga Dhexe ee sannadlaha ah, haddii ay suurtagal u tahay Dawladda dhaqaale ahaan.

2) Kororkaas waxay ku xirnaan doontaa in Baarlamaanku ku ansixiyo qoondada miisaaniyad sannadeedka Sanduuqa Hawlgabka.

3) Kororkaas waxa la jaangoynayaa ugu dambayn bisha Juun ee sannad kasta, iyadoo lagu saleynayo kororka maciishadda ee sannadkii ka horreeyey, waxaana la dhaqangelinayaa ugu dambayn bisha Jannaayo ee sannadka xiga.

# CUTUBKA SHANAAD
# QODOBBO GUNAANAD AH

## Qodobka 21aad
## Soo saarista Xeernidaamiyeyaal iyo Awaamiir

1) Wasiirka Wasaaradda Shaqada wuxuu soo saarayaa Xeernidamiyeyaal lagu dhaqangelinayo Xeerka Hawlgabka iyo Liiltirka

2) Haddii ay lagama maarmaan noqoto, Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka wuxuu soo saarayaa tallaabooyin ama ammarro ku habboon oo la xariira hirgelinta Xeernidaamiyeyaasha Sharcigan.

## Qodobka 22aad
## Baabi'in

Waxa la baabi'iyey sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 23aad
## Dhaqangalka

Sharcigani wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka JFS, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

**Lifaaq 1aad: Keydka sanadaha adeegii hore oo lagu saleynayo sanadka dhalashada.**

**F.G:** Shaxdan hoose waxay tixraacaysaa Qodobka 5aad(2)(b) waxaana si buuxda loogu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiyeyaasha sharcigan marka la dhaqan-geliyo.

| **Sanadka dhalashada (Year of Birth)** | **Tirada sanadaha loo xisaabayo adeegii hore (Years of Past Service Credit)** |
|---|---|
| 1956 ama ka hor or Earlier | 15 |
| 1957 | 14 |
| 1958 | 13 |
| 1959 | 12 |
| 1960 | 11 |
| 1961 | 10 |
| 1962 | 9 |
| 1963 | 8 |
| 1964 | 7 |
| 1965 | 6 |
| 1966 | 5 |
| 1967 | 4 |
| 1968 | 3 |
| 1969 | 2 |
| 1970 | 1 |
| 1971 | 0 |